

## Natijada Gudbista: Ogaysiska Natijada Baadhista Pulse Oximetry-ga

Barnaamija Baadhis-  
ta Dhawaan-dhaladka  
Minnesota



### Ilmahaagu waa **gudbay baadhista pulse oximetry**.

Baadhista pulse oximetry waxay dareentay heerka ogsijiinta inay caadi tahay dhiiga ilmahaaga. Tani waxay ka dhigan tahay ilmahaagu inaanu muujin calaamadaha xanuunka wadne lagu dhasho ee halista ah (CCHD). Wax baadhis dheeraad ah looma baahna wakhtigan.

#### **Waa maxay xanuunka wadnaha lagu dhasho ee khatarta ah (CCHD)?**

Xanuunka wadnaha lagu dhasho waa kooxda ugu badan xanuunada lagu dhasho. Xanuunada wadnuhu waxay dhibaatooyin ku keenaan qaabdhismeedka wadnaha iyo sida dhiigu u socdo. CCHD waxa loo tixraaca xanuunada wadnaha ee ay tahay in xilli hore wax laga qabto si gacan looga gaysto kahortaga dhibaatooyinka kale ee caafimaad.



#### **Maxay baadhista CCHD ay muhiim u tahay?**

Inkastoo ultrasound-ka dhalmada kahor uu dareemi karo kiisaska qaar ee CCHD, dhammaantood lama dareemi karto kahor dhalmada. Haddii aan la baadhin inyar kadib dhalashada, carruurta qabta CCHD marmarka qaar waxa la geeyaa guriga iyada oon la daryeelin sababtoo ah waxay u muuqdaan inay caafimaad qabaan. Marka guriga, carruurtani waxay yeelan karaan dhibaatooyin caafimaad oo halis ah inta badana waxay u baahnaadaan daryeel gurmad ah. Haddii CCHD xilli hore la dareemo, hase yeeshie, dhallaanka waa la daawayn karaa waxayna u horseedaa nolol caafimaad leh.

#### **Maxaa xiga ee dhaca?**

Baadhista Pulse oximetry ma dareemo dhammaan kiisaska CCHD. Waxa muhiim ah ilmahaagu inuu ka helo baadhis joogto ah bixiyaha koowaad ee daryelka iyo inaad adigu si dhaw ula socoto wadnaha ilmahaagu inuu leeyahay calaamadaha CCHD.

#### **La soco wadnaha ilmahaaga.**

**Wadne garaaca** – ma dhakhso ama qunyar ayuu garaacayaa?

**Tamarta** – ma hurdo ama xanaaq badan yahay?

**Muuqaalka** – ma cawl ama buluugbaa maqaarku?

**Neefsiga** – ma dhakhso ama qunyar ayuu u neefsanayaa?

**Hheerkulka** – ma qabow yahay taabashada?

Waxa muhiim ah inaad la xidhiidho bixiyaha koowaad ee daryelka ilmahaaga ama cusbitaalka si dhakhso ah haddii ilmahaagu uu leeyahay wax ka mid ah astaamaha korka ku yaal.

#### **Ma qabtaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan baadhista pulse oximetry?**

Ha ka yabaalin inaad wacdo Barnaamija  
Baadhista Dhawaan-dhaladka  
(800) 664-7777  
ama internetka nagu soo booqo  
[www.health.state.mn.us/newbornscreening](http://www.health.state.mn.us/newbornscreening)